10

Sida Xeerka Qoyska Loogu Qaybiyo Hantida

SOM 010

XEERKA QOYSKA EE HAWEENKA GUDAHA ONTARIO

Haweenka oo dhan. Xeerka Qoyska waa mid.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Sida Xeerka Qoyska Loogu Qaybiyo Hantida

Buuganyarahan waxaa loogu talagalay in lagugu siiyo faham kooban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Ma aha mid beddelaya tallooyinka gaarka ah ee sharci iyo gargaarka. Haddii aad la tacalayso arrimaha sharciga qoyska, waxaa lagula talinayaa inaad hesho tallo sharci sida ugu dhakhsaha badan si aad u fahamto tallaabooyinka kuu habboon iyo inaad ilaaliso xuquuqdaada. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lagactiisana u bixin lahayd fiiri buugyarahayaga "Helitaanka Macaawimada ee Dhibaatooyinka la xiriira Xeerka Qoyska". Waxa kale oo laga yaabaa in aad rabto in aad akhrisato buugyaraha ku saabsan "Heshiisyada Qoyska", iyo inaad fiirsato aqoon korarsiyada internetka ee "Raadinta Garyaqaanka Sharciga Qoyska", "Xuquuqda Hantida iyo Waajibaadka kuwa isqaba iyo kuwa isla nool", iyo mawduucyada kale ee ku saabsan sharciga xeerka qoyska. Dhammaan macluumaadkan waxaad ka heli kartaa oo ay ku qoran yihiin bogga internetkayaga ee www.onefamilylaw.ca.

Marka aad adiga iyo lammaanahaagu kala tagtaan, waxay noqoneysaa inaad kala qaybsataan, wixii hanti ah ee aad qoys ahaan u wada lahaydeen qofba intii u heli lahaa. **Hanti** waxaa loola jeedaa wax kasta ee qof uu leeyahay, sida guriga, baabuurta, waxa sida khaaska qofku u leeyahay iyo alaabta guriga, hawlgabka, xisaabaha bangiga iyo wixii kale ee maalgelin ah. Hanti waxaa kale oo ka mid **deynta**. Deyntu waa ballanqaad inaad dib u bixin doontid lacag aad horey usoo amaahatay. Deyntu waxay noqon mid guri iibsi, iibsi baabuur iyo mid amaah ah.

Qiimaha hantida qaarkood mudo ayey isku beddeli kartaa, sida dhulka, ganacsi, xisaabaha bangiga iyo maalgelinta. Marka lamaane ay qeybsanayaan hantida qoyska, qiimeynta hantida ee sida caadiga ah ay u isticmaalayaan waxa xaddiga inta lacagta le'eg tahay marka la fiiriyo qiimaha hantida taariikhda labada qof ee wada noolaa ay kala tageen ayna ogaadeen inayna dib u wada noolaan doonin.

Marka laba qof oo wada noolaa ay kala tagaan, waxaa jira xeerar sharci ah oo u qaybinaya hantidii ay lahaayeen intii ay xiriirka lahaayeen. Xeerarka qeybinta hantida qoyska waxay noqon karaan kuwo aad u adag. Haddii aad ku sugan tahay xaalad sidaas oo kale ah, waxaa lagula talinayaa in aad hesho tallo sharci garyaqaan sharciga qoyska ah.

Ontario, marka laba wada nool ay kala tagaan, habka ay hantidooda u qaybsanayaan waxay ku xiran tahay inay ama inayna si sharci ah isku qabin. Labada qof ee sida sharciga ah isuqaba waxay si toos ah u qaybsanayaa qiimaha hantida qoyska haddii ay kala tagaan. Labada qof ee wada nool, laakiin aan si sharci ah isuqabin, waxaa laga yaabaa inay leeyihiin xuquuqda ah hantida inay wadaageen, laakiinse iyagu si toos uma laha xuquuqdaas markaas Maxkamadda ayaa laga yaabaa in ay go'aan ka gaarto.

Sida loogu Qaybiyo Hantida Laba sida sharciga ah isuqabta

Sharciga wuxuu guurka u arkaa inuu yahay iskaashi dhaqaale oo loo maleynayo in xubin kasta ee guurkaas ku jirtaa ayaa si isku mid ah uga qayb qaatay xiriirkaas, dhaqaale ahaan iyo siyaabo kaleba.

Marka labada isqabtaa ay kala tagaan, xeerka guud waa in xubin kasta ee qaaskaas ay si siman qayb uga hesho qiimaha hantida kasta ee ay lahaayeen intii ay isqabeen welina isla leeyihiin markaas ay kala tagayaan. Sida caadiga ah xubin kasta ee gurkaas ku jira waxay haysaneysa hantidooda u gaarka ah, balse waa in ay qaybsadaan wax kasta oo ku kordha qiimaha hantidooda muddadii ay isqabeen, taas oo aan ku xirneyn cidda bixisay lacagta ama cidda u magaciisu sharci ahaan ugu qoran yahay hantidaas. Si arrintan loo sameeyo, mid ka mid xaaskaas sida caadiga ah waa inuu siiyaa xaaska kale lacagta, taas oo loo yaqaan "**lacag bixinta laysla ek'eysiiyo**". Talaabadda lagu ogaanayo qiyaasta lacag bixinta laysla ek'eysiiyo hoos ayey ku sharaxay.

Waa maxay Qaabka qeybinta hantida qoyska?

Labada sida sharciga ah isuqabta, qaabka qeybinta hantida qoyska waxaa lagu magacaabaa **Is-lek'eysiiyo**. Waxaa jira laba talaabo oo muhiim ah ee qaabka is-lek'eysiiyo.

Tallaabo 1: Xisaabin Hantida Saafida ah ee Qoyska (NFP)

Qof kasta oo xaaskaas ka mid ah waa inuu xisaabiyaa inta hantidiisa gaarka ah ay dhantahay marka laga jaro wixii deyn ah ee lagu leeyahay, oo la yidhaahdo **Hantida Safida ah ee Qoyska (NFP)**.

Si arrintan loo sameeyo, qof kasta ee qoyskaas wuxuu xisaabinayaa qiimaha hantidooda marka laga jaro deymaha, laga bilaabo taariikhda guurka, ilaa taariikhda kala tagga. Si loo dhameystiro xisaabinta Hantida Safida ah ee Qoyska, waxaa lasoo

qaadanayaa dhammaan qiimaha hantida oo laga jaray deymaha oo dhan taariikhda kala tagga markaasna laga gooynayaa qiimaha hantida oo laga jaray deymaha oo dhan taariikhda guurka. Tusaale ahaan:

Xaaska A - hantida guud ee laga jaray deymaha	
Taariikhda kala tagga:	$ 120,000
Taariikhda Guurka:	$ 50,000
KalaTagga - Guurka =	$ 70,000
Hantida Safida ah (NFP) ee Xaaska A =	**$ 70,000**

Xaaska B - hantida guud ee laga jaray deymaha	
Taariikhda Kala Tagga:	$ 45,000
Taariikhda Guurka:	$ 25,000
Kala Tagga - Guurka =	$ 20,000
Hantida Safida ah (NFP) ee Xaaska B =	**$ 20,000**

Tallaabo 2: Qaybsiga kororsiimaha hantida qoyska si siman

Kaddib markii xaas walba u xisaabiyo Hantida Safida ah (NFP) ee u gaarka ah, xaaska leh NFP sareysa waa inuu qaar ka mid ah dheerigaas la qabsadaa xaaska kale. Tusaalahaan, Xaaska A oo leh $ 70,000 NFP waa inuu qaar ka mid ah la qaybsadaa Xaaska B oo leh NFP $ 20,000.

Xaaska A waa inuu bixiyaa kala bar oo bar farqiga u dhexeeya labada tiro ee Xaaska B. Sidaas weeye sida lacagta laysla **ek'eysiiyo** kala bar ahaan:

Lek'eysiiyo Lacag Bixinta – laba isqaba si siman ayey u qabsanayaan korodhka hantida qoyska

Xaaska A NFP =	$ 70,000
Xaaska B NFP =	$ 20,000
Xaaska A - Xaaska B = korodhka hantida Qoyska	$ 50,000 waa

$ 50,000 oo ka kala badh = $ 25,000

Xaaska A waa inuu siiyo Xaaska B $ 25,000 in lacag bixinta lays lek'eysiiyo.

Mararka qaarkood, Maxkamadda waxay amri kartaa lacag is-lek'eysiiyo ka duwan haddii lacagta is-lek'eysiintu tahay mid cadaalad darro ku jirto. Tusaale ahaan, Maxkamadda ayaa laga yaabaa inay amar ku siiso mid ka mid ah xaaska haddii ay dhacdo inuu qofkaas lacag badan oo deyn ah meel ku qarsaday waqtigii la isqabay, ama haddii xaaskaas u si ujeeddo leh uu u galay deyn badan.

Waxyaabaha ka baxsan Xeerarka Guud

i) Maxaa Dhaca Marka Mid ka mid ah Xaaska uu qabo deyn ka badan hantida kale?

Mararka qaarkood waxa dhici kara in xaaska u qabo deyn ka badan qiimaha hantida ee saafiga ah (oo sidoo kale loo yaqaan hantida). Dhamaadka guurka, taas macnaheedu waxay noqon kartaa in ayna haysan lacag ku filan bixinta daymaha.

Mararka qaarkood qiimaha saafiga ah ee dhammaan hantida xaaskaas ayaa hoos u dhaca muddada la isqabo. Taasi Waxay noqon kartaa in hantidoodu ka yar tahay marka ay kala tagayaan tii ay haysteen markii ay is guursanayeen.

Markii mid ka mid ah xaaladahan ay dhacdo, Xisaabinta Hantida Safida ah ee Qoyska (NFP) waxay noqoneysa mid ka hooseysa eber ama ka yar (taas oo noqoneysa tiro taban ee eber ka yar).

Si taas loo xisaabiyo lacag bixinta la is-lek'eysiiyo marka ay xaaladdu sidaas noqonto, xaaska leh eber ama ka hoos ee NFP wuxuu leeyahay eber ($ 0) NFP ee bixinta lacagta is-lek'eysiiyo (halkii ay ka ahaan lahayd tiro taban). Sidaas darteed, xaaska leh hantida badan waajib kuma aha inuu caawiyo xaaska kale oo u bixiyo deymihiisa, oo ma aha inuu bixiyo lacag bixinta is-lek'eysiinta oo aan cadaalad ahayn.

ii) Hoyga Qoyska

Hoyga qoyska labada isqabta waxaa loo fiiriya si ka duwan hantida kale oo dhan. Hoyga qoyska, sidoo kale loo yaqaan **guriga milkida**, waa hooy u qoyskaagu si joogto ah ugu noolaa tan iyo kala taggiina.

Haddii xaasku u iibsaday hoyga qoyska intii ay isqabeen, si siman ayey u qabsanayaan qiimaha hoygaas maalinta kala tagga. Marka laba isqaba kala tagaan, labada qofba waxay xaq u leeyihiin inay qaybsadaan qiimaha buuxa ee hoyga qoyska taariikhda kala tagga, iyada oo aan la fiirineyn sharci ahaan cidda u magaciisu ku qoran yahay hantidaas.

Marka keliya ee qiimaha hoyga qoyska usan qayb ka ahaaneyn lacag bixinta la is-lek'eysiiyo waa haddii adiga iyo saygaada aad kala saxiixateen heshiis (heshiiska guurka ama heshiiska kala tagga) kaas oo sheegaya in guriga u banaanka ka ahaan doono lacag is-lek'eysiiyta.

Laakiin haddii hal xaas u lahaa guriga guurka kahor oo u ahaa guri qoyskoodu lahaa taariikhda kala tagga, sharciyo gaar ah ayaa maamula. Xaaskii lahaa guriga kahor guurka wuxuu ku darayaa qiimaha guriga taariikhda kala tagga xisaabinta Hantida Safida ah ee Qoyska (NFP), laakiin kuma jiraan qiimaha guriga ee hantidu lahayd taariikhda guurka.

Taas macnaheedu waxa weeye haddii hal xaas lasoo galay guriga waqtigii guurka oo u weli isagu leeyahay guriga taariikhda kala tagga, NFP giisa/keeda waxa ka mid noqon doona qiimaha dhan ee guriga, ee aan ahayn oo keliya isbedelkii ku dhacay qiimaha intii la isqabay. Tani waxay saameyn weyn ku yeelan kartaa xisaabinta lacag bixinta la is-lek'eysiiyo.

iii) Hantida ka Reebban – Hadiyadaha iyo Dhaxalka
Waxa kale oo jira qaar ka mid ah ee ka reeban xeerarka guud ee qeybinta hantida qoyska hadiyadaha gaarka ah iyo lacagta. Tusaale ahaan Qaarka ka reeban waxay yihiin: hadiyado ama lacagta mid xaaska ka mid uu ka helo qof kale oo aan ahayn xaaskiisa; faa'iidooyinka caymiska nolosha ee qof kale; iyo dhaxalka. Dhaxalku waa wax qofka kale kaala dardaarmo ama kaaga tago marka ay dhintaan.

Noocyada hantidaas ah ee aad heshay inta lagu jiro guurka waxaa sida caadiga ah, ay yihiin "**hanti ka reebban**" sidaas darteed **laguma darayo** xisaabinta Hantida Safida ah ee Qoyska (NFP). Haddii aad kharajgarayso lacag kaasoo gashay hadiyado, caymiska nolosha ama dhaxalka inta lagu jiro guurka, inta badan waa dhib in raadraac lagu sameeyo, sidaas darteedna lacagtaas lagama saari karo marka la xisaabinayo qof kaas NFP.

Laakiin waxaa muhiim ah in la ogaado in haddii hadiyadaas ama dhaxalkaas loo isticmaalo dhinaca gadashada ama hagaajinta hoyga qoyska, markaas waxay qayb ka noqoneysa qiimaha hoyga qoyska, kaas oo lagu dirayo marka la xisaabinayo NFP.

Sida loo Qaybiyo Hantida Labada Qof ee Sharciga-Maxaliga isku la Nool

Lamaanayaasha ku wada nool xiriir caadi ah laakiin dooratay inayna si sharciga waafaqsan isu guursan waxaa mararka qaarkood loo yaqaan wada noolaad "**sharciga-maxaliga ah**". Inkasta oo sharcigu siyaabo badan u aqoonsan yahay xiriirka sharciga-maxaliga, xeerarka ku saabsan qeybinta hantida qoyska marka lamaane kala tagaan ma ay khuseeyaan lamaanaha iskula nool sharciga-maxaliga ah ee ku nool Ontario.

Xiriirka sharciga-maxaliga ah, qof kasta oo idinka mid wuxuu leeyahay wax kasta oo hanti ah oo u kusoo biiriyey xiriirka iyo wax alla wixii u ku soo iibsaday lacag u gaar ah intii ay wada noolaayeen. Haddii aad adiga iyo lammaanahaagu kala tagtaan, ma jiraan wax xaq toos ah ee kala qaybinta ama qaybsiga qiimaha ku kordhay hantida.

Si kastaba ha ahaatee, hantida aad adiga iyo lammaanahaagu soo wada iibsateen waxaad si wadajir ah labadiinnuba u wada leedihiin. Labada qof ee hanti si wadajir ah u leh wuxu mid walba xaq u leeyahay qaar ka mid ah qiimaha hantidaas, haddii mid idinka mid ah ama labadiinuba aad dooneysaan inaad kala tagtaan. Taasna waxaa ka mid noqonaya hoyga qoyska.

i) Hoyga Qoyska
Lamaanaha ku wada nool sharciga-maxaliga ma laha xuquuq isku mid ah inay u qaybsadaan qiimaha hoyga qoyska. Hoyga aad ku wada nooleydeen waxa iska leh qofka magaciisu ku qoran ee milkiyadda sharci ahaan.

ii) Heshiisyada Wada noolaanshaha
Adiga iyo lammaanahaaga sharciga-maxaliga ah waxaad kala qoran kartaan **heshiiska wada-noolaanshaha** si loo meel dhigo sidii wixii laga yeeli lahaa hantida iyo deymaha marka aad kala tagtaan. Heshiiska wada-noolaanshahu waa mid sharci ah haddii u yahay qoraal, oo ay saxiixeen labada lamaane una saxiixay qof kale oo goob joog ka ahaa ama markhaati ka ahaa marka lamaanayaashu saxiixayeen. Waa fikrad fiican in aad la hadasho qareen kahor inta aadan saxiixin heshiiska wada-noolaanshaha.

iii) Aadista Maxkamad
Waxaad weydiinsan kartaa Maxkamadda inay amar ku bixiso in lammaanahaagu sharciga inuu fuliyo shuruudaha heshiiska wada-noolaanshaha. Haddii aadan lahayn heshiiska wada-noolaanshaha ee aydnaan ku heshiin karin qaybsiga hantidiina, midkiin kasta wuxu u tagi karaa maxkamadda. Waxaad Garsooraha weydiisan kartaa inuu kuu go'aamiyo qayb ka mid ah wixi aad soo wada iibsateen, ama qayb ka mid ah qiimaha hantida kusoo korortay intii xiriirku idiinka dhexeeyey.

Si aad u hesho abaalmarinta noocan oo kale ah, waa in aad awoodda inaad caddayso in aad ka qayb qaadatay dayactirka ama kororka qiimaha hantida. Tusaale ahaan, waxaad ka heli kartaa qaar ka mid ah lacag haddii aad caddeyn karto in aad

bixineysay qaar ka mid ah biilasha oo ku saabsan guriga lamaanahaaga, ama inaad kororsiga qiimaha ganacsigiisa ama ganacsigeeda aad kaalin ka qaadatay adiga oo ku shaqeynayey lacag la'aan. Waxaa muhiim ah in aad la hadasho qareen haddii aad ku fikirayso inaad tagtid Maxkamadda.

Sii Joogista Hoyga Qoyska

Sharciyada ku saabsan cidda sii joogi karta hoyga qoyska, iyo cidda iibin kartaa, sidoo kale waxay ku xiran tahay in lamaanayaashu ay si sharciga waafaqsan isku qabeen ama in xiriir sharciga-maxalliga ka dhexeeyey.

i) Lammaanayaasha Sida Sharciga ah Isu-qaba

Labada sida sharciga ah isuqaba waxay leeyihiin xuquuq siman in ay sii joogaan hoyga qoyska ilaa inta laga iibiyo ama ilaa u kasoo baxo Amar Maxkamadeed ama heshiis, iyada oo aan loo eegeyn cidda heshiiska ama sharci ahaan magaciisu ugu qoran yahay hantida. Xaaska midkoodna ma bedeli karo qufulka, iibiyo, raham geliyo, kireeyo ama sii kireeyo hoyga isaga oo aan ogolaansho ka haysan xaaska ee.

ii) Lammaanayaasha ku wada nool Sharciga-macaliga ah

Sharciyada khuseeya hoyga laba sida sharciga ah isuqaba ma saameynayaan kuwa ku wada nool sharciga-maxaliga ah. Lammaane uma laha xaq si toos ah sii joogista hoyga qoyska haddii isaga ama iyada ayna magaciisa/magaceeda ayna ku qorneyn heshiiska kirada ama lahaanshaha milkiyadda sharci ee hantida. Haddii lamaanaha midkood keliya u leeyahay hantida, qofkaas oo keliya ayaa beddeli kara qufullada, iibin kara, rahaamad gelin kara, kireyn ama sii kireyn

kara hoygaas iyada oo wax oggolaanshaha laga helin lamaanaha kale. Haddii aad guriga ama dabaqa ijaar ugu jirtaan, kaliya qofka soo saxiixay heshiiska kirada ayaa xaq u leh kusii noolaanshaha gurigaas.

iii) Marka ay jirto Xadgudubka
Marka laba qof oo si **sharci ah isuqaba**, haddii midkood u cabsi waxyeelo ka qabo midka kale, qofka cabsida qabaa wuxuu ka codsan karaa Maxkamadda Qoyska **Amarka ah Haysashada U khaaska ah** ee hoyga qoyska. Haysashada U khaaska ah waxay ka dhigan tahay in xaaska mid ka mid ah oo kaliya u xaq u leeyahay in ay sii joogaan hoyga qoyska, iyo beddeli kara qufullada. Xaaska kale wuxuu lumiya xaquuqduu u laha soo galitaanka hoyga qoyska.

Amarrada Haysashada U khaaska ah badanaa waxaa loo codsan kara hoyga qoyska ee lamaanuhu wada leeyihiin. Amarkaas ma beddeli karo xaqqa labada qof u leeyihiin in ay qaybsadaan qiimaha hoyga qoyska. Amarrada Haysashada U khaaska badanaa waxay khusaysaa ilaa uu ka dhaco go'aan xallinta lahaanshaha iyo qaybsiga qiimaha hoyga qoyska.

Lammaanaha iskula nool sharciga-maxalliga ah ma heli karaan amarrada haaysashada u khaaska ah ee hoyga qoyska.

Qofka ay baqin uga jirto dhibaato naftooda ama carruurtooda ee ka imanaysa lammaanaha kale ee ay xiriirka leeyihiin, haddii ay isqabaan iyo haddi ayna isqabin, wuxuu Maxkamadda Qoyska ka codsan karaa Amarka Dhawritaanka. **Amarka Dhawritaanka** waxa lagu sheegi karaa in lammaanaha xad-gudbaha saameynaya aan loo oggolaan inuu la xiriiro ama kasoo ag dhowaado lammaanaha kale ama carruurta.

Taas waxay ka mid noqon karta ka fogaanta hoyga qoyska, iyo sidoo kale goobta shaqada, dugsiga, iyo meelaha kale ee lammaanaha kale ee la badbaadinayo iyo carruurtu ay sida caadiga u tagaan.

Qof wuxu heli karaa Amarka Dhawritaanka ka dhanka ah lammaanaha xadgudub sameeyey ama ha ahaadaan kuwo isqaba ama isqabay, ama haddii ay isla nool yihiin ama hore ay isla noolaan jireen. Muhiim ma aha inay hoyga wada leeyihiin ama wada kireysteen, ama qofka magiciisu ku qoran yahay sharciga mulkiyedda hantida. Amarka Dhawritaanka wax saameyn ah kuma leh lahaanshaha hoyga qoyska, ama sida qiimaha hoyga loo qaybsan doono.

Sharciyada Hantida Qoyska ee Meelaha ay ku Nool yihiin Dad Canada Asalka u ah "Reserves"

Sharciga Qoyska ee Dowladda Ontario ay gudbisey ma khuseeyo dhulka, guryaha iyo dhismayaasha **Qowmiyaddaha Kowaad Meelaha ay deggan yihiin**. Laakiin waxaa jira sharciga dowladda federaalka ah oo khuseeysa hantida qoyska ee "Reserveska, haddii Koox ay iyada xeerisay si u gaar ah "Reservegooda".

Sharciga federaalka wuxuu saameeya labada isqabta, iyo sidoo kale lammaanayaasha ku wada nool sharciga-maxalliga ah kuwaas oo lahaa xiriir muddo hal sano ah ama ka badan. **Waxay muhiim u tahay haweenka Asalka ah iyo kuwa aan-Asalka ahayn labadoodaba ee ku nool ama qoyskooda hanti ku leeyahay Reserveska**.

Sharciga federaalka wuxu sheegayaa in:

· Labada lammaanaba waxay xaq u leedahay kala bar kororka qiimaha hoyga qoyska, dhulka iyo dhismayaasha sii kordhay intii xiriirku ka dhexeeyey;

· Maxkamadda ayaa amar ka bixin karta **Amar Khaas ah** in mid ka mid ah lammaanayaasha u xaq u leeyahay inuu ku sii noolaado guriga qoyska kaddib markii ay kala tagaan, taas oo an ku xirneyn in qof hoyga goooni u leeyahay iyo in kale.

• Haddii ay jiraan dhibaatooyin waxyeeleyn ee u dhexeeya lammaanayaasha ama hoyga, oo ay jirto xaalad deg deg ah si looga ilaaliyo dhibaato qofka guriga ugu timaado, Maxkamadda ayaa bixin karta **Amarka Ilaalinta Degdegga** ah kaas oo sheegaya in hal lammaane u xaq u leeyahay inuu ku noolaado guriga qoyska 90 maalmood, xataa haddii lamaanaha kale u leeyahay hoyga iyo haddi usan lahayn, lamaanahaas kalena waa inuu hoyga kasoo ag dhawaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hantida qoyska on Reservega, fiiri bug yaraha FLEW ee Haweenka Asalka ah, "Sida loou Qaybiyo Hantida ee Xeerka Qoyska". Waxaad kaloo ka eegi kartaa aqoon isweydaarsiga webinar, "Ilaalinta xuquuqda haweenka hoyga qoyska Reservegs". Macluumaadkan waxaad ka heli kartaan shabakadda internetkayaga ee www.onefamilylaw.ca.

Fikradaha halkan lagu muujiyey qoraalladan waa fikradaha FLEW sidaas darteed kama turjumeyso fikradaha Gobolka.

Inkastoo ay qoraaladan taageero dhaqaale ka heleen Uruka Sharciga ee Ontario, waxyaabaha ku qoran daabacaadan kama tarjumeyso aragtida Ururka .

Waxaa jira halis weyn oo gacan ka hadal ah markii xiriir kalgacal ah u burburo. Haddii aad ku sugan tahay khatar degdeg ah, wac 911. Haddii adiga ama qof aad taqaan u halis ku jiro, booqo bogga FLEW website wixii macluumaad ah ee ku saabsan helitaanka taageero.

Haddii aad tahay qof dumar ah ee fransiiska ku hadala oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay inaad heshid adeegyada luuqadda Faransiiska marka ay socoto maxkamadda xeerka qoyska. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir qareen, Xarumaha sharciga ee bulshada, ama khadka taageerada Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u heli lahayd adeegyada Faransiiska boggayaga internetka www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska ee Soomaali ah oo diyaarka ah*

1. Waxyaabaha kala duwan ee Xallinta Khilaafaadka iyo Xeerka iyo Qoyska (SOM 001)
2. Sharciga Badbaada Carruurta iyo Qoyska (SOM 002)
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. Sharciga qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo Booqashada Caruurta (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Waan-waanta Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. Xeerka Qoyska sida kuwa soo haajiray, qaxootiga iyo Haweenka Sharciga Lahayn(SOM 008)
9. Helitaanka macaawinta ee dhibaatooyinkaaka xeerka qoyska (SOM 009)
10. **Sida loo Qaybiyo Hantida ee Xeerka Qoyska (SOM 010)**
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. Taagyerada xaaska (SOM 012)

** Buugyarahan waxaa lagu heli karaa qaabab iyo luuqado kala duwan. Fadlan fiiri www.onefamilylaw.ca wixii macluumaad dheeraad ah. Waxa kale oo aad ka heli kartaa qoraallo dheeraad ah bogga internetka ee kaa caawinaya in aad fahamto xuquuqdaada qoran xeerka qoyska .*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

The Law Foundation of Ontario

Funded by: / Financé par :
Ontario

Fikradaha lagu muujiyey qoraaladan waa fikradaha FLEW sidaas darteed kama turjumeyso fikradaha maalgaliyayaasha.